



**Iyadoo ay qeyb ka tahay istaraatiijiyadda IT-ga ee maamulka carruurta- iyo waxbarashada waxaa laga dhigayaa maamulka xagga dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiga xilliga firaaqada mid dijitaal ah. Taasoo macneheedu tahay in waxyaabaha gacanta lagu qabto maanta, tusaale: codsiga booska dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiga xilliga firaaqada, lagu maareyn doono barta wax kulmisa ee intarneedka. Waalidka degmada Säffle waxaa ay tani uga dhigantahay hab cusub oo loo maamulo meeleynta ku aaddan dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiga xilliga firaaqada.**

3:da oktoobar waxaa ay degmada Säffle dhaqan gelineysaa nidaam cusub si loo maamulo codsiga, meeleynta, maareynta safka, isbeddellada dakhliga iyo jadwalka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiga xilliga firaaqada. Nidaamka cusubi, IST Förskola/fritidshem, waxaa uu waaliddiinta iyo maamulayaasha labadaba u dhib yareynayaa geedi socodka codsiga iyo hawlaheenna. Xagga waaliddiinta IST Förskola/fritidshem waxaa uu u yahay qalab si dhib yar loo isticmaali karo si loogu sameeyo codsi dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiga xilliga firaaqada, loo aqbalo loogana jawaabo soo bandhigidda, markaas ka dibna canugga laguugu casuumo boos.

### **Maxaa ay taasi ka waalid ahaan iigaga dhigaa doontaa?**

Laga billaabo 3:da oktoobar dhammaan codsiyada, macluumaadka dakhliga, isbeddellada jadwallada iyo boos iska celintu waxaa ay si dijitaal ah uga dhacayaan barta wax kulmisa ee intarneedka. Ka waalid ahaan waxaad si ootomaatik ah u heleysaa bog aad leedihiid haddii aad ku gashid aqoonsiga elekteroonigga ah. Ka dibna boggaaga ayaad ka maamuli doontaa isbeddel kasta oo taabanaya meeleynta canuggaaga ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo/ama dugsiga xilliga firaaqada. Waxa adigu ka waalid ahaan aad u baahantihid in aad sameysid 3:da oktoobar ka hor waa in aad sameysatid aqoonsiga elekteroonigga ah haddii aadan horbaba lahayn.

### **Maxaan sameynayaa haddii aanan fursad u haysan in aan helo aqoonsi elekteroonik ah?**

Haddii aadan haysan tobanka nambar oo buuxa ma heli kartid aqoonsiga elekteroonigga ah. La xiriir gacan hayaha meeleynta Eva Lindström, markaasna caawimaad ayaad heleysaa. Haddii aad caawimaad uga baahantihid turjumaan afka ah ama mid qoraal ah waxaad la xiriiri kartaa Mittpunkt i Säffle (MiS).

#### **Eva Lindström**

[eva.lindstrom@saffle.se](mailto:eva.lindstrom@saffle.se)

0533-68 16 88

**Mittpunkt i Säffle**, Perssons gränd 5B

0533- 68 16 36, 0533-68 16 37



**SÄFFLE KOMMUN**